Jadwalada Qoyska Ee Akhris-qoraalka

Per-K

Ilmahaaga ka taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aad noo soo ogaysiiso sida ay u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

Calaamadaha ku yaalo hoosta jadwal walba waxay muujinaayaan:

- Isticmaal Ingiriis
- Isticmaal luuqadaada hooyo
- Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada(haaga) Hooyo

Tell us how we did!

Jadwalada Daryeelka Maalinlaha

- Markaad dooranayso dharka aad xiranayso, kala hadal **magacyada kala duwan ee dharka**. Kala hadal wax ku saabsan **sababta** aan dhar kala duwan ugu xirano cimilada kala duwan.
- Aqoonso dhawaaqyada iyo xarfaha ay ku bilaabanayaan. Tusaale: jaakad/ dhaxan-reeb, koofiyad/koofi-gambis, surwaal/surwaal-suuf/jiinis.
-

Jadwalada Shaqada Guriga

- Kala hadal wax ku saabsan qoraallada **"khayaaliga"** iyo "**aan khayaali ahayn**". Qoraalada khayaaliga ahi waa qoraalo la iska yeelyeelo (ma aha kuwo dhab ah). Qoraallada aan khayaaliga ahayn
- waa qoraallo dhab ah.Qoraallada khiyaaliga ah ee ku saabsan xayawaannada ayaa muujinaya xayawaann ada oo hadlaya ama gaari wado. Qoraallada aan khayaaliga ahayn ee ku saabsan xayawaannada ayaa sheegaya xaqiiqooyinka

Jadwalada Wakhtiga Cuntada

- Ciyaar **ciyaarta dhawaaqa**, halkaas oo aad ku kalaytamaysaan dhihitaanka dhawaaq kasta oo kala duwan ee ku jira kelmada. Tusaale: food (f-oo-d), rice (r-i-s), apple (a-p-l), tofu (t-o- f-oo).
- Inta aad aqoonsanayso ereyada tilmaan wax kasta oo qaafiyadaas ah. Tusaale: food iyo mood; rice iyo dice.

Jadwalada Wakhtiga Ciyaarta iyo Fasaxa

- Eeg **KidLitTv**, oo ah mareegta wax kasta oo ku saabsan buugaagta carruurta. (www.kidlit.tv). Isku day bogga "rimoorada buugga"
- **Hordhacyada buuggu** waa sida hordhacyada filimada oo kale, marka laga reebo buugaagta! Waxay muujinayaan hordhacyo ku saabsan waxa buugaag kala duwani ku saabsan yihiin.

Jadwalada Banaanka

- Soo hel alaab dibadda ah oo ka bilaabma **xarafka koowaad** ee magaca koowaad ee ilmahaaga. Tusaale: Nasir; nest, neighbor, nut, nickel, net.
- Sidoo kale ku tijaabi ciyaartan xarafka koowaad ee magaca dambe ee ilmahaaga!

Jadwalada Socodka, Wadista Baabuurta & Baska

- Weydii ilmahaaga inay saadaaliyaan waxay u malaynayaan inay arki doonaan intay baabuurka saaran yihiin, baska raacayaan, ama bannaanka socdaan. Tusaale: Miyay laba bas arki doonaan? Qof la socda eeygiisa? Gaadhi dab-demis ah? Afar gaari oo madow?
- Kordhi adigoo waxyabaaha saadaalinaya. u qaafiyadaysan (Tusaale ahaan:

Wakhti walba!

- Kala hadal "ereyada dareenka" ee kala duwan (murugo, isku-buuq, niyad-jab, waalan) ee luqadaada hooyo iyo Ingiriisiga.
- Kala hadal waxa erayadani loogala jeedo iyo sida qof u dhaqmi karo haddii ay sidaas dareemaan. (Tusaale: Waxaa laga yaabaa inay ooyaan haddii ay murugaysan yihiin.)

Fikrad-celinta: Kadib markaad toddobaadkan isku daydo jadwaladaan, ka jawaab su'aalaha soo socda:

Maxaa idiinka hagaagay hawlaha aad toddobaadkan isla samayseen ilmahaaga?

Maxaad ka baratay ilmahaaga?

Jadwalada Qoyska Ee Akhris-qoraalka

Per-K

Ilmahaaga ka taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aad noo soo ogaysiiso sida ay u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

Calaamadaha ku yaalo hoosta jadwal walba waxay muujinaayaan:

- Isticmaal Ingiriis
- Isticmaal luuqadaada hooyo
- Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada(haaga) Hooyo

Tell us how we did!

Jadwalada Daryeelka Maalinlaha

- Marka la gaaro dhammaadka maalinta (inta aad nasanayso kadib hawlaha fiidka, markaad sariirta isku diyaarinayso), **kala hadal ilmahaaga wax ku saabsan waxyaalihii** dhacay maalintaas.
- Haysashada fursado badan oo aad si cod dheer ugu hadasho afkaaga hooyo iyo Af-Ingiriisiga waxay caawisaa xirfadaha luqadda ilmahaaga.

Jadwalada Shaqada Guriga

- Markaad si wadajir ah buug u wadaagaysan, **kala hadal qaybaha buugga** (jaldiga hore, jaldiga dambe) iyo habka loo rogo boggaga.
- Sidoo kale kala hadal **jihada loo akhriyo erayada Af-Ingiriis ah** (laga bilaabo bidix ilaa midig). Kani ma isla jihada loo akhriyaa afkaaga hooyo? Jihadaani ma la mid baa tan luqadaada hooyo?

Jadwalada Wakhtiga Cuntada

- Kala hadal noocyada **macluumaadka ee ku qoran baakadaha cuntada** iyo sababta macluumaadkaasi halkaasi ugu qoran yahay.
- Waa maxay sababta ay u leedahay maaddooyin? Waa maxay sababta ay kuugu sheegayso macluumaadka nafaqada? Waa maxay sababta ay u siiso tilmaamaha cunto karinta?

Jadwalada Wakhtiga Ciyaarta iyo Fasaxa

- Ka eeg mareegta Ilmaha Juqraafiga **Qaranka (National Geographic Kids)** si aad u hesho qoraalo, muuqaalo, iyo hawlo madadaalo leh. Isticmaal bogga **"Xayawaannada"** si aad wax uga ogaato xayawaannada kala duwan! (kids.nationalgeographic.com)
- Wargeyska National Geographic Kids ayaa sidoo kale si bilaash ah looga heli karaa maktabadda dadweynaha

Jadwalada Banaanka

- Ciyaar **ciyaarta dhawaaqa isku dhafan** oo leh waxyaabaha aad dibadda ku aragto.
- Si gooni ah u dheh dhawaaq kasta oo ereyga ah kadibna wada dheh dhammaantooda si wadajir ah (isku dhafan) si aad ereyga u samayso. Tusaale: Erayga "truck" wuxuu leeyahay afar dhawaaq (t-r-u-k). Si gaar ah u dheh dhawaaq kasta, dabadeedna dhawaaqyada hal mar wada dheh.

Jadwalada Socodka, Wadista Baabuurta & Baska

- Inta aad wadadaada ku socoto, kala hadal **waxyaalaha kala duwan ee aad aragto** oo ugu magacaw ama ugu qeex ilmahaaga luqadaada hooyo iyo Af-Ingiriisiga. Tusaale: Kaasi waa wiish. Waxa loo isticmaalaa inuu ka caawiyo dhisidda waxyaabaha. Taasi waa helikobtar. Waxay ku duushaa hawada.
- Aqoonso calaamadaha caanka ah ee deegaanka (Tusaale: McDonalds)

Wakhti walba!

- La yeelo lmahaaga wada hadal ku saabsan **xusuusta** aad soo martay ee ku leedahay carruurnimadaadii.
- Wada sheekaysiga (wax kasta ku saabsan!) ayaa aad muhiim ugu ah ka caawinta carruurta xirfadahooda luqadeed ee luqadaada hooyo iyo Ingiriiska.

Fikrad-celinta: Kadib markaad toddobaadkan isku daydo jadwaladaan, ka jawaab su'aalaha soo socda:

Maxaa idiinka hagaagay hawlaha aad toddobaadkan isla samayseen ilmahaaga?

Maxaad ka baratay ilmahaaga?

Jadwalada Qoyska Ee Akhris-qoraalka

Per-K

Ilmahaaga ka taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aad noo soo ogaysiiso sida ay u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

Calaamadaha ku yaalo hoosta jadwal walba waxay muujinaayaan:

- Isticmaal Ingiriis
- Isticmaal luuqadaada hooyo
- Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada(haaga) Hooyo

Tell us how we did!

Jadwalada Daryeelka Maalinlaha

- Markaad is diyaarinayso subixii ama aad isku diyaarinayso sariirta habeenkii, **kala hadal ilmahaaga** qoraal aad wada akhrideen ama bandhig muuqaal-baahiye/filim aad wada daawateen halkaas oo jilayaasha ay sidoo kale isku diyaarinayaan.
- Jilaayaashu miyay samaynaayeen wax la mid ah waxyaabaha ay ilmahaaga samaynayeen?

Jadwalada Shaqada Guriga

- Soo raadi **muuqaal si cod dheer lagu akhrinayo oo qof ku akhrinayo buug** aad guriga ku haysato ama ka soo amaahatay maktabadda. La soco buugga marka uu qofku akhrinayo qoraalka.
- Meesha ugu fudud ee laga heli karo qoraalka kor loo akhrinaayo waa **YouTube.com**. Ku baar magaca buugga.

Jadwalada Wakhtiga Cuntada

- Ma jiraan **makhaayado ama dukaamo raashin oo maxalli ah** oo haayo cunto ka timid dhaqankaaga ama shey ay ku qoran yihiin afkaaga hooyo?
- Isku day inaad ilmahaaga **wax kala cuntid mid ka mid ah makhaayadahan** ama la booqato mid ka mid ah dukaamadan raashinka oo kala hadal cuntooyinka iyo erayada halkaas ku qoran.

Jadwalada Wakhtiga Ciyaarta iyo Fasaxa

- Markaad wada ciyaaraysan**, iska dhig inaad tahay shaqaalaha** bulshada (dabdemiska, shaqaalaha dukaanka raashiinka, adeegaha makhaayadaha). Waa maxay noocyada waxyaabaha uu shaqaaluhu sheegi lahaa ama samayn lahaa?
- Ciyaartan iska yeelyeelka noocan ahi waxa ay ilmahaaga ka caawisaa xirfadaha luqadda waxayna bartaa dadka ku nool bulshada dhexdeeda.

Jadwalada Banaanka

- Akhri ama dhageyso **qoraal khayaali ah (aan run ahayn)** halkaas oo jilayaashu bannaanka joogaan (goobta darjiinka, waddada magaalada, kaynta dhexdeeda).
- Markaad dibadda la joogto ilmahaaga, kala hadal waxyaalaha qoraalka ku jiray oo aad dibadda ku aragto.

Jadwalada Socodka, Wadista Baabuurta & Baska

- Markaad wada socotaan, muusig ku dhageyso luqadaada hooyo. Kala hadal ilmahaaga waxa ay heestu ku saabsan tahay iyo qoraalka uu heesaagu ku sheegayo heesta dhexdeeda. Isticmaal ereyada marka koowaad, xigta, iyo kan dambe.
- Ka hadal magaca heesta iyo waxa ay yihiin xarafka iyo dhawaaqa ay ku bilaabato kuna dhammaato.

Wakhti walba!

- Fiiri BrainPop Junior mareegta: jr.brainpop.com
- Mareegtaan waxay leedahay muuqaalo gaagaaban, oo kartoon ah kuwaas oo bara mawduucyo kala duwan: akhrinta/qorista, xisaabta, sayniska, cilmiga bulshada, caafimaadka, farshaxanka/tignoolajiyada. Fiiri muuqaalada "Xubnaha qoraalka" ee qaybta "Akhrinta iyo Qorista".

Fikrad-celinta: Kadib markaad toddobaadkan isku daydo jadwaladaan, ka jawaab su'aalaha soo socda:

Maxaa idiinka hagaagay hawlaha aad toddobaadkan isla samayseen ilmahaaga?

Maxaad ka baratay ilmahaaga?

Jadwalada Qoyska Ee Akhris-qoraalka

Ilmahaaga ka taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aad noo soo ogaysiiso sida ay u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

Per-K

Calaamadaha ku yaalo hoosta jadwal walba waxay muujinaayaan:

- Isticmaal Ingiriis
- Isticmaal luuqadaada hooyo
- Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada(haaga) Hooyo

Tell us how we did!

Jadwalada Daryeelka Maalinlaha

- Haddii wax akhrisku ka mid yahay jadwalkaaga hurdada, isku day inaad sameyso socod sawir ka hor inta aadan akhrin qoraalka.
- Socodka sawirku waa marka aad marka hore eegto dhammaan sawirada qoraalka, adiga oo aan akhriyin erayada. Tani waxay ka caawinaysaa ilmahaaga **inuu saadaaliyo** waxa qoraalku ku saabsan yahay.

Jadwalada Shaqada Guriga

- Ciyaar ciyaarta dhawaaqa koowaad. Weydii canugaada inuu ku dhawaaqo kaliya dhawaaaqa ugu horeeya ee kelmad.
- Tusaale: Weydii canugaada inuu yiraahdo "sanduuqa". Kadibna dheh dhawaaq kasta oo ka mid ah "box" (b-o-x). Marka xigta, weyddii canugaada inuu dhaho kaliya dhawaaqa ugu horeeya ee "box" ("b").

Jadwalada Wakhtiga Cuntada

- Kala hadal ilmahaaga wax ku saabsan cuntooyinka kala duwan oo mid kastaa idiinka mid ah uu jecel yahay iyo uusan jeclayn.
- Ku kalaytamo ka hadalka sababta aad u jeceshahay ama aadan u jecleyn cuntooyinka. Ma jiraan cuntooyin cusub oo ilmahaagu isku dayi karaan? U sheeg ilmahaaga sida ay u carfayaan ama dhadhamaayaan cuntooyinkan cusub.

Jadwalada Wakhtiga Ciyaarta iyo Fasaxa

- Si wadajir ah u wada **sawira/u rinjiyeeya.** Marka ilmahaagu dhammeeyo, weydii inay wax kaaga sheegaan sawirkooda/rinjiyeyntooda.
- Qor waxa ay sheegaan, oo ku dheji sawirkooda. Tani waxay tusinaysaa ilmahaaga in qoraalku uu bixiyo macluumaad.

Jadwalada Banaanka

- Akhri ama dhageyso **qoraal aan khayaali ahayn (dhab ah)** oo ku saabsan dibadda/dabiiciga (xoolaha, geedaha, cimilada).
- Markaad dibadda la joogto ilmahaaga, kala hadal waxyaalaha qoraalka ku jiray oo aad dibadda ku aragto iyo waxyaalo kale duwan. Miyay mid ka mid ah shayadan qaafiyobaan? Maxay yihiin dhawaaqyada ay ku bilaabaan?

Jadwalada Socodka, Wadista Baabuurta & Baska

- Markaad baabuur wadato, fuulayso baska, ama socoto, **ka hadal noocyada kala duwan ee baabuurta** (gawaari, mootooyin, baabuurta qashinka) ee aad aragto.
- Kala hadal ilmahaaga **waxa baabuurtu qabtaan**. Tusaale ahaan: Ambalaasta waxay dadka geeyaan isbitaalka. Kala hadal baabuurta ay fuuleen
- iyo halka ay ku aadeen.

Wakhti walba!

- Daawo waraysi uu bixiyey **qoraaga/sawir-yaqaanka buugga carruurta.** Buugaagtooda ayay ka sheekeynayaan oo mararka qaar buugaagta cod dheer ayey ku akhriyaan. Fiiri Reading Rocket si aad u hesho muuqaalada qoraaga/sawir-yaqaanka:www.readingrockets.org/books/interviews.
- Jooji muuqaalka si aad u weydiiso su'aalo daah furan oo ku saabsan

Fikrad-celinta: Kadib markaad toddobaadkan isku daydo jadwaladaan, ka jawaab su'aalaha soo socda:

Maxaa idiinka hagaagay hawlaha aad toddobaadkan isla samayseen ilmahaaga?

Maxaad ka baratay ilmahaaga?

Jadwalada Qoyska Ee Akhris-qoraalka

Per-K

Ilmahaaga ka taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aad noo soo ogaysiiso sida ay u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

Calaamadaha ku yaalo hoosta jadwal walba waxay muujinaayaan:

- Isticmaal Ingiriis
- Isticmaal luuqadaada hooyo
- Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada(haaga) Hooyo

Tell us how we did!

Jadwalada Daryeelka Maalinlaha

- Markaad dhammaynayso shaqooyinka guriga, kala hadal dhammaan meelaha aad ereyada ku aragto. Tusaale: qolka lamadaayada wuxuu bixiyaa tilmaamo lagu dhaqo laguna qalajiyo, calaamadaha ku yaalo dharka waxay sheegayaan sida loo dhaqo loona qalajiyo.
- Ma jiraan wax gurigaaga yaalo oo ay ku qoran yihiin ereyo luqadaada hooyo ah?

Jadwalada Shaqada Guriga

- Ka hor inta aadan si wadajir ah qoraalka u akhrinin, weydii ilmahaaga **inuu saadaaliyo** waxa qoraalku ku saabsanaan doono.
- Magaca qoraalka, sawirka jaldiga ku yaal, ama sawirada qoraalka ku jira waxay kaa caawin karaan saadaalinta.

Jadwalada Wakhtiga Cuntada

- Isticmaal liis cunto si aad canugaada ula sameyso badar fudud ama cunto! Kala hadal qaybaha **kala duwan ee maadooyinka cuntada** (maaddooyinka ku jira, tilmaamaha) iyo macluumaadka qayb kasta.
- Aqoonso oo kala hadal waxa uu yahay xarafka iyo dhawaaqa oo uu maaddooyinka kasta ka bilaabmo.

Jadwalada Wakhtiga Ciyaarta iyo Fasaxa

- Isku day inaad ilmahaaga **la dhegeysato buug** ku qoran luqadaada hooyo iyo Af-Ingiriis. Aqoonso xarafka/dhawaaqa uu buuggu ku bilaabmayo kuna dhammaanayo.
- Eeg mareegta intarnetka: www.uniteforliteracy.com kooban in ka badan 500 oo buug waxaana sid cod dheer ah loogu akhriyi karaa in ka badan 50 luqadood.

Jadwalada Banaanka

- Markaad dibadda joogto, iska dhig inaad tacabur ku jirto! Waxaad noqon kartaa budhcad-badeed raadinaya hanti duugan ama sahamiyayaal dabiici ah oo raadinaya xayawaan ama dhir gaar ah.
- Maxay yihiin waxyaalaha uu qofka tacaburka ahi odhan lahaa ama samayn lahaa? Waa maxay alaabaha ay ku heli lahaayeen tacaburkooda? Aqoonso wax kasta oo qaali ah oo qaafiyad

Jadwalada Socodka, Wadista Baabuurta & Baska

- Soo xasuuso wax ku saabsan qoraal/filim oo adiga iyo ilmahaagu wada akhriseen/daawateen**. Kala hadal waxyaalaha ka dhacay qoraalka/filimka.**
- Ilmahaagu miyay xasuusan karaan cidda ku jirtay qoraalka/filimka? Waa maxay waxa ka dhacay bilowga iyo waxa ka dhacay bartamaha iyo dhammaadka?

Wakhti walba!

- Si wadajir ah u akhriya buug sawir oo aan
- Isku day inaad ilmahaaga la dhegeysato buug ku qoran luqadaada hooyo iyo Af-Ingiriis. Aqoonso xarafka/dhawaaqa uu buuggu ku bilaabmayo kuna dhammaanayo.
- Eeg mareegta intarnetka: www.uniteforliteracy.com kooban in ka badan 500 oo buug waxaana sid cod dheer ah loogu akhriyi karaa in ka badan 50 luqadood.

Fikrad-celinta: Kadib markaad toddobaadkan isku daydo jadwaladaan, ka jawaab su'aalaha soo socda:

Maxaa idiinka hagaagay hawlaha aad toddobaadkan isla samayseen ilmahaaga?

Maxaad ka baratay ilmahaaga?